



**CITY OF BUFFALO  
OFFICE OF NEW AMERICANS**

XAFIISKA MAREEKANKA CUSUB MAGAALADA BUFFALO



BYRON W. BROWN  
MAYOR/DUQA

JESSICA M. LAZARIN  
DIRECTOR/AGAASIME

**Magaalada Buffalo: Tasmada Adeegyada & Waxtarka Asaasiga**

<https://www.ci.buffalo.ny.us>

Magaalada Buffalo waa magaalo soo dhaweyn leh taas oo siiso barnaamijyo iyo adeegyo dhamaan dadka deggan oon ku xirneyn xaaladda socdaalka.

**Xarunta Wicitaanka iyo Xalinta ee Duqa Magaalada (311)**

Wac 311 ama (716) 851-4890 si aad u hesho taleefon lambarada adeegyada aan amar jensiga ahayn ee magaalada Buffalo laguuguna gudbiyo waax walbo ama adeeg walbo ee magaalada. Adeegyada magaalada ee aan amar jensiga ahayn waxaa kamid ah arrimaha xadgudubyada guryaha iyo meelaha baabuurta ladhigto, godadka wadada, wadooyinka, meesha dadka maraan, baraf kaxaaqidda, qaadidda qashanka iyo xadbudubyada, iyo kuwa badan. Waxaa jira app lagu soo dejiisan karo taleefonka gacanta oo lacag la'aan ah, waxaa ladhahaa **Buffalo 311**, taas oo kuu ogolaanayso inaad kusoo gudbiso warbixin appka aadna lasocota warbixinada meesha ay marayaan.

**Shahaadooyinka Dhalashada, Dhimashada iyo Guurka:** (716) 851-5432

Shahaadooyinka Dhalashada, Dhimashada iyo Guurka ee lasiiyo dadka deggan magaalada Buffalo waxaa laga heli karaa Xafiiska Karaaniga Magaalada Buffalo ee ku yaalo dabaqa 13aad City Hall.

**Maktabadda (laaybereeri) Dadweynaha Buffalo iyo Deegaanka Erie:** (716) 858-8900, <https://www.buffalolib.org>

Buuggaag, CDs, DVD's lacag la'aan ah, intarneet iyo koombiyuutarro lacag la'aan ah, fasalada lagu barto kombiyuutarka, fasalada luuqadda Ingiriiska, howlaha carruurta oo laga heli karo 37 laamood oo kukalayaalo xaafadaha. Laamaha qaar ayaa bixiyo fasalada lagu barto jinsiyadda iyo cashirada Af Ingiriiska oo ah Luuqada labaad.

**Xarunta Tababarka & Shaqada ee Buffalo (BETC):** (716) 856-5627, <http://www.workforcebuffalo.org/>

BETC waa xarun hal mar lagaheli karo shirkadaha horumarinta shaqaalaha iyo hay'adaha lashaqeeyo oo ujeedooda tahay caawinta dadka deggan magaalada Buffalo iyo Deegaanka Erie inay helaan shaqo iyo caawinta shirkadaha loo shaqeeyo inay helaan shaqaale u qalmo in ay shaqaaleestaan.

**OGOW XUQUUQDAADA**

**Goobta Shaqada Dhexdeeda Waxaad Xaq u Leedahay In:**

- Aad u dacwoota saacadaha dheeraadka lacagtooda, mushaarka kaa maqan, iyo eexasho laguugu sameeyo.
- Inaad dalbato magdhawga shaqaalaha haddii ay waxyeelo kaa soo gaartay goobta shaqada dhexdeeda.
- Haddii laguugu ceyriyo inaad kahadashay dhibaata shaqada ama mushaarka; maxkamad ayaad lafuuli kartaa qofka aad u shaqeyso adigoo ku dacweynaayo in aargudasho laguugu sameeyey ama qalad laguugu ceyriyey.
- Gorgortan iyo u midoobid si looga doodo xaaladaha shaqada ama mushaarka.
- Waxaa jiro sharciyo kaa ilaalinayo eexashada kusalaysan da'da, naafada, qoomiyada, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, midabka, diinta, iyo qaabka aad u galmoota.

**Waxii akhbaar dheeraad ah ama si aad usoo gudbiso dacwo lasoo xiriir Laanta Shaqada ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Gobolka New York:** 1-(800)-771-7755, <https://ag.ny.gov/bureau/labor-bureau>.

**Waaxda Adeegyada Dhalinyarada:** (716) 851-5177

Waxuu bixiyaa tababarada horumarinta shaqaalaha iyo fursadaha shaqo ee dhalinyarada.

**Xafiiska Adeegyada Waayeelka:** (716) 851-4141

Waxuu kor uqaadaa wanaajinta dadka waayelada isagoo kataageerayo howlaha dhaqanka, daryeelka caafimaad, guryaha, shaqada iyo fursadaha mutadhawacnimada ee lasiiyo dadka da'dooda kaweyntahay shan iyo konton jirka.

**Waxbarashada**

**Isu diiwaan gelinta iskoolka ee qof walbo waa lacag la'aan:** Fasalada Barbaarinta (sadex ilaa lix jir) ilaa fasalka Laba iyo Tobnaad. Laxiriir Xarunta Diiwaangelinta Dhexe ee Xafiiska Degmada Iskoolada Dad weynaha Buffalo, 33 Ash St, Buffalo NY 14204, (716) 816-3717, <http://www.buffaloschools.org>.

**Barnaamijka Bartaha Af Ingiriiska:** (716) 816-3577 ext. 1310,

<http://www.buffaloschools.org/multilingual>. Waxuu taageero siiyaa ardayda barta Af Ingiriiska.

**Kulliyad/Jaamacad:**

Waxay u furantahay dhamaan codsabayaasha iyadoo uu qarash kala duwan kubaxayo. Liistada deeqaha waxbarashada waxaa laga heli karaa <http://www.buffaloschools.org/webpages/guidancebavpa/scholarships>, meesha ay kuqoran tahay "General Scholarships" hoosteeda halkaas oo aad kaheli karto liistada fursadaha deeq bixiyayaal kala duwan.

**Barnaamijka Waxbarashada ee Say Yes:** (716)-247-5310, <http://sayyesbuffalo.org/>

Deeqaha Waxbarasho ee Say Yes Buffalo waxaa heli karo ardayda ka qalin jebisay iskoolada dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leylahay ee ay dowladda taageerto iyo kuwa ay shaqsiyaadka, qoysaska, ganacsatada iyo ururada maalgeliyaan.

**Qeybta Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Iskoolada Dadweynaha Buffalo:** (716) 888-7088 ext.100, <http://www.upskill.org/>

Fasala Habeysan iskuna xiga ee Shahaadada u Dhiganto Dugsiga Sare, waxbarasho dadka waaweyn, waxbarashada Bulshada, xirfad iyo barnaamijyada barashada farsamada ayey heli karaan dhamaan ardayda waaweyn.

**Barnaamijka Xeerarka Aqriska Mayor Byron W. Brown:** 716-851-7323

Waraaqaha codsiga waxaa laga soo dajisan karaa ama lagu gudbin karaa [www.city-buffalo.com/readingrules](http://www.city-buffalo.com/readingrules). Barnaamijka waxaa looga tala galay inuu ardayda kacaawiyo inaysan kadhumin ayna kororsadaan aqoontooda aqriska iyo qoraalka inta lagu jiro bilaha xilliga xagaaga.

**Akademiyada Kaqeyb qaadashada Muwaadiniinta ee Mayor Byron W. Brown:** (716) 851-5534

Waxaa loo sameeyey inuu siiyo dadka deggan magaalada Buffalo faham wanaagsan ee sida ay u shaqeyso dowladda magaalada/maxaliga iyadoo laqabanayo fagaare looga hadlayo qaabka iyo maamulka Dowladda Magaalada Buffalo. *Soo wac waxii faafaahin ah iyo in labeli karo.*

**Barnaamijka Shaqada Dhalinyarada Xilliga Xagaaga ee Mayor Byron W. Brown:** (716) 851-5887 ama (716) 851-4001

Waxuu bixiyaa lix isbuuc oo shaqo ah iyo tababar udiyaarin shaqo oo lasiinayo dhalinyarada jira da'da afar iyo toban ilaa labaatan iyo kow Magaalada Buffalo xilliga bilaha xagaaga.

**Gargaar Cunto: Barnaamijyada ay Bixiso Waaxda Arimaha Bulshada ee Deegaanka Erie,** (716) 858-7239

- **Barnaamijka Gargaarka Cuntada Dheeriga ah (SNAP)** waxuu siiyaa qoysaska dhaqaalahooda hooseeyo lacag ay ku gataan cunto si uu caafimaadkooda u ficnaado. Iyadoo kuxeran xaaladda socdaalka, haddii qofka shaqeyo balse uusan weli iskufilneyn, waxuu ku kordhisin karaa dhaqaalahiisa lacagta SNAP.
- **Barnaamijka Gargaarka Cuntada Dheeriga ah ee Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)** looga talagalay hooyooyinka nuujinayo, carruurta ilaa da'da shan jirka iyo dhallaanka.

## **Guryaha**

**Maamulka Guryaha ee Dowladda Hoose Buffalo:** (716)-855-6711

Waxuu siiyaa adeegyo iyo fursada laxiriira gurya kiradooda yarthay, wanaagsan, amaana ah shaqsiyaadka iyo qoysaska dhaqaalahooda hooseeyo ama uu dhexdhexaad yahay.

**Xafiiska Cadaaladda Guryaha Magaalada Buffalo:** (716)-851-4212

Waxuu kacaawiyaa shaqsiyaadka gudbinta dacwadaha laxiriira fuuqqa iyo dacwadaha laxiriira dejinta guryaha. Waraaqaha gudbinta waxaa laga heli karaa Qeybta Adeegyada Muwaadinka, ee kutaalo qolka 218 ee City Hall.

**Adeegyada Ogolaanshaha iyo Kormeerka:** (716)-851-4926, (716)-851-4949

Kormeerayaasha waxay xaqiijiyaan in shuruucda dhismaha, guriga, caafimaadka, nabad gelyada iyo fayidhowrka laraacayo; dacwadaha ku saabsan xadgudubka dhismaha/xeerka ama milkiilaha/kireystaha halkaan ayaa laga buuxin karaa.

## **Marka aad lakulmayso Booliska**

**Waaxda Booliska Magaalada Buffalo kuma xireyso adigoo soo sheegayo dembi. Wac 911 haddii aad tahay dhibane dembi laga galay ama marka aad aragto wax walwal kuugu dhaliyo.**

Waaxda Booliska Buffalo (BPD) waxay raacdaa qaabka booliska bulshada kumana weydiinayso mana gudbinayso xaaladda socdaalka. Maxirto muhaajiriinta ilaa inay u haysato warqad lagu soo xirayo ama sabab kale oo keenayso in laxiro moyaane. Uma baahnid inaad booliska kala hadasho xaaladaada soo galooti ama muwaadinimo.

Haka been sheegin xaaladaada Muwaadinimo ama haqaadanin waraaqa been abuur ah.

## **Ogow Xaqiiqda Si aad ugu Badbaada Khiyaanada Lagu sameeyo Muhaajiriinta**

- ✓ U teg keliya qareen leeysin haysto ama mas'uul kasocda Gudiga Racfaanka Socdaalka, BIA waxii talo sharciga socdaalka kusaabsan.
- ✓ Nootaayada iyo kuwa kale ee bulshada katirsan waxay kaliya buuxin karaan foomamka si kooban, waa inaysan kaala talinin foomka labuuxinayo ama sida loo buuxinayo.
- ✓ Si aad u hesho liistada ururada aan faa'iida doonka ahayn ee lashaqeyo BIA iyo mas'uuliyiintooda booqa: [justice.gov/eoir/recognition-accreditation-roster-reports](http://justice.gov/eoir/recognition-accreditation-roster-reports).

**Haddii aad u aaminsantahay in laguugu sameeyey musuq maasuqa socdaalka fadlan laxiriir Lambarka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka New York u qaabilsan Musuq maasuqa Socdaalka:** 1(866) 390-2992.